



Xulashada/Doorashada Dugsiga - Maamulka Su'aalaha badanaa La Isweydiiyo

Halkee ayey ku taallaa Qaybta Xulashada/Doorashada Dugsiga?

Qaybta Xulashada/Doorashada Dugsiga waxay ku taalaa 430 Cleveland Avenue, oo ku dhex taala Xarunta Diiwaan-gelinta Dhexe ee Dugsiyada Magaalada Columbus oo ku taal Ft. Hayes Campus. Taleefoonkuna waa 614-365-7459, si kastaba ha ahaatee habka ugu wanaagsan ee loola xiriiri/xidhiidhi karo Qaybta Doorashada/Xulashada Dugsiga waa iimaylka ah (schoolchoice@columbus.k12.oh.us).

Ilmahaygu hadda kuma jiro Dugsiyada Magaalada Columbus laakiin/balse waxaan ku noolahay Degmada Dugsiyada Magaalada Columbus. Sideen ku ogaadaa meesha uu ilmahaygu dugsiga ka dhiganayo/ka dhigan doono?

Waalidiinta/wakiilada/mas'uuliyiinta waxay booqan karaan degelka/website-ka Dugsiga Magaalada Columbus ccsoh.us/enroll oo guji furaha (tab-ka) 'Raadi Dugsigaaga' ('Find Your School'), ama waxay iimayl u diri karaan Qaybta Doorashada/Xulashada Dugsiga ee ah (schoolchoice@columbus.k12.oh.us) ama waxay wici karaan khadka XAQIIQADA/FACTline ee ah (614-221-FACT) si ay u ogaadaan ciwaanka dugsiga lagu qoray.

Maxaa dhacaya haddii aan doorbido/doort dugsiga aan ahayn dugsiga cinwaankayga?

Waalidiinta/wakiilada/mas'uuliyiinta waxay codsan karaan dugsiga caadi ah ama ka beddellan iyada oo loo marayo habka bakhtiyaa-nasiibka doorashada/xulashada dugsiga ee sannad-dugsiyeedka soo socda. Waalidiinta waxaa si weyn la idiinku dhiirigelinayaa inaad baartaan/baadhaan doorashooyinkiina/xulashooyinkiina iyaga oo booqanaya degelka/website-ka dugsiga, daawanaya faylka (profile-ka) muuqaalka fiidiyoowga dugsiga, akhrinaya faylka (profile-ka) dugsiga, ama ka qayb-galaya Bandhigga/Carwada Xulashada/doorashada Dugsiga ee Internet-ka (Virtual-ka) ka hor intaysan soo gudbin arjiga/codsiga.

Waa maxay jadwal-wakhtiyeedka loogu talagalay meelaynta hoos timaada Doorashada/doorashada Bakhtiyaa-nasiibka Dugsiga ee sannad-dugsiyeedka 2022-2023?

Si codsiga loogu daro Bakhtiyaa-nasiibka danabaysan/elegtarooniga ah ee Dugsiga Sare iyo Dhexe, codsiga waa in lagu soo gudbiyaa isku xirka Xulashada/Doorashada Dugsiga iyada oo loo soo marayo Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal) inta u dhaxaysa 5-ta Janaayo, 2022 iyo 28-ka Febraayo, 2022. Codsadayaasha soo daaha waxaa lagu dari doonaa dhamaadka liiska sugitaanka kadib dhammaan kuwa soo codsaday wakhtiga kama dambaysta ah ee bakhtiyaa-nasiibka. Codsashada kama dambaysta ah waxay siinaysaa ardayga fursad wanaagsan oo loogu tixgeliyo mid ka mid ah dugsiyada la doonayo/la rabo.

Si codsiga loogu daro Dugsiga Hoose ee Bakhtiyaa-nasiibka danabaysan/elektaroonigga ah codsiga waa in lagu soo gudbiyaa isku xirka Xulashada/Doorashada Dugsiga ee Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Infinite

Campus Parent Portal) inta u dhaxaysa 1-da Febraayo, 2022 iyo 31-ka Maarso, 2022.

Codsadayaasha/Arjileeyda soo daaha waxaa lagu dari doonaa dhamaadka liiska sugitaanka ka dib dhammaan kuwa soo codsaday wakhtiga kama dambaysta ah ee bakhtiyaa-nasiibka. Codsashada kama dambaysta ah waxay siinaysaa ardayga fursad wanaagsan oo loogu tixgeliyo mid ka mid ah dugsiyada la doonayo/la rabo.

Haddii ilmahaagu hadda dhigto Dugsiga Magaalada Columbus, waa inaad samaysataa/abuurtaa koontada Xarunta Xiriirka Waalidka ee Campus Infinite si aad u gudbiso arjiga bakhtiyaanasiibka. Si aad u abuurto akoon Xariirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal account), waa inaad haysataa macluumaadkaaga ah GUID (furaha gelitaanka) GUID (access key), kaas oo laga heli karo dugsiga ilmahaaga. Waxa jira fiidiyowyo tallaabo-tallaabo ah iyo waraaqo la heli karo oo ku saabsan Xiriirka Waalidka (Parent Portal) iyo Codsiga Xulashada/Doorashada Dugsiga. Booqo bogga Dugsiyada Magaalada Columbus ee ah www.ccssoh.us oo guji Waalidiinta, kadibna/dabadeed dhagsii xiriirka Waalidka (Parent Portal) ee dhinaca bidix ee bogga.

Haddii ilmahaagu AANU hada ka diwaan-gashanayn Dugsiga Magaalada Columbus, waxa aad u baahan doontaa in aad ku dhamaystirto Diiwaan-gelinta Onlaynka ah ayada oo loo marayo SpeedyPass adiga oo booqanaya <http://ccsoh.us/Enrollment.aspx> (<http://lccsoh.us/Enrollment.aspx>). Inta lagu jiro tallaabada ugu dambaysa ee Diiwaan-gelinta Ka hor ee Onlaynka ah, waxaadna u baahan doontaa inaad ballan qabsato/samaysato si aad ula kulanto Khabiirka/takhasus laha Diiwaan-gelinta oo aad keento waraaqaha/dukumiintiyada loo baahan yahay. Marka waraaqaha/dukumiintiyada la helo ee ah diiwaan-gelinta xogta macluumaadka la dhammeeyo, waxaad heli doontaa macluumaadkaaga ah GUID (furaha gelitaanka) GUID (access key) si aad u abuurto/u samayso koontada Xiriirka Waalidka (Parent Portal account).

Waa maxay farqiga u dhexeeya dugsiga caadi ah iyo dugsiga kale/belelka ah? Dhammaan dugsiyada magaalada Columbus waxay adeegsadaan/isticmaalaan manhaj isku mid ah. Dugsiyada bedelka/ kale waxay ku kala duwan yihiin sida maaddooyinka loo dhigo/loo barto (hababka, naqshadaynta fasalka, iwm.) ama jihaynta/diiradda waxbarashada (farshaxanka, luuqadda, xisaabta iyo sayniska, iwm.)

Waa maxay noocyada kala duwan ee codsiyada bakhtiyaa-nasiibka iyo sideese u shaqeeyaan?

Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/Doorashada Dugsiga: Oo loogu talagalay waalidiinta/wakiilada/masuuliyiinta ardayda rabta inay codsadaan inay dhigtaan dugsi aan ahayn dugsiga lagu qoray.

Ogolaanshaha Boos Qabashada: Ardayda hadda dhigata dugsi u qalma in ay boos kuri ka sii qabsadaan dugsiga xiga oo leh barnaamij isku mid ah. (FADLAN FIIRO GAAR AH (PLEASE NOTE: Haddii codsiga boos celinta la gudbiyo, dhammaan codsiyada kale ee firfircoon waa la joojin/tirtiri doonaa. Haddii aad hadhow wax ka bedesho maskaxdaada ku saabsan boos-celinta/sii qabsashada, waa inaad soo gudbisaa daahidda arjiga ee bakhtiyaa-nasiibka si aad fursad ugu hesho inaad dhigato dugsi kale, oo uu ku jiro dugsiga cinwaanka.) Codsiyada boos-celintu waxa ay diyaar noqon doonaan 5-ta Janaayo, 2022 waana in la soo gudbiyaa ilaa 31-ka Janaayo, 2022 iyada oo loo sii marinayo isku xirka/isk xidhka Xulashada/Doorashada Dugsiga ee Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal).

Ku soo Laabashada Dugsiga Guriga: Ardayda dhigata dugsi ku yaala Dugsiyada Magaalada Columbus ee aan ahayn dugsigooda cinwaanka. Codsiga wuxuu diyaar u noqon doonaa soo gudbinta laga bilaabo 5-ta

Janaayo, 2022 waana in lagu soo gudbiyaa iyada oo loo soo marayo isku xirka Xulashada/Doorashada Dugsiga ee Xarunta Xiriirka Waalidka (Infinite Campus Parent Portal) ilaa/marka la gaaro 22-ka Maarso, 2022.

Ogolaanshaha Xulashada: Ardayda buuxisay shuruudo gaar ah (Ardaydu waxay heli doonaan martiqaad si ay uga qayb-galaan). Codsiga Ogolaanshaha Xulashada wuxuu diyaar yahay soo gudbintiisa laga bilaabo 10-ka Janaayo, 2022 ardayda u qalanta waa in lagu soo gudbiyaa iyada oo loo soo marayo isku xirka Xulashada Dugsiga ee Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal) ilaa/marka la gaaro 31-ka Janaayo, 2022.

Is-diiwaan-gelinta Degmooyinka Furan (JOE): Ardayda ku nool meel ka baxsan xuddudaha Dugsiyada Magaalada Columbus oo raba inay dhigtaan dugsi ku yaalla Degmada CCS. Xilliga kama dambaysta ah ee arjiga/codsiga IOE wuxuu raacayaa isla wakhtiyada kama dambaysta ah ee Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/Doorashada Dugsiga.

Ciidanka Cirka ee JROTC: Ardayda galaya fasalada 9-aad -ilaa 12-aad kuwaas oo xiisaynaya inay ka qayb-qaataan Tababarka Sarkaalka Kaydka da'yarta dugsiga sare ee Ciidank Cirka (JROTC) ee Fort Hayes. (FADLAN FIIRO GAAR AH: Ardayda ogolaata/aqbasha Dugsiga Fort Hayes iyada oo loo marayo ROTC waxaana lagu soo celin doonaa ciwaanka dugsiga haddii go'aan laga gaaro. Codsiyada ROTC waxaa la soo gudbin karaa laga bilaabo 5-ta Janaayo, 2022 waana in lagu soo gudbiyaa ilaa 21-ka Febraayo, 2022 iyada oo loo soo marayo isku xirka Xulashada/Doorashada Dugsiga ee Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal).

Codsiyo kala duwan ayaa laga yaabaa inay diyaar u yihiin ardayda. Kaliya codsiyada uu ardaygu xaqa u leeyahay ayaa muujin doona qof-ahaan/ikhtiyaar ahaan shaashadda codsiga.

Waa maxay farqiga u dhexeeya Wadarta Bakhtiyaa/nasiibka/Isku-Baan-dhaynta Guud ee Magaalada oo dhan, Wadarta Bakhtiyaa-nasiibka/Isku-Baan-dhaynta Gobolka, ama Ma leeyahay dad loo qoondeeyay oo leh Isku-Baan-dhaynta Magaalada oo dhan ama Iku-baan-dhaynta Gobolka?

Wadarta Bakhtiyaa-nasiibka/Bakhtiyaa-nasiibka Isku baan-dhaynta Magaalada oo dhan: Ardayna Laguma meelaynin dugsiga iyada oo lagu salaynayo ciwaankooda. Waalidiinta/wakiilada/masuuliyiinta ardayda ka soo jeeda mid ka mid ah lixda bulsho ee degmada ayaa codsan kara dugsiga. Haddii la ogollao/la aqbalo, gaadiid waa la siin doonaa haddii ay ku nool yihiin in ka badan 2-bo mayl dugsiga.

Wadarta Bakhtiyaa-nasiibka/ Baan-dhaynta Gobolka: Ma jiro arday lagu meeleeeyay dugsiga ciwaankooda awgiis. Kaliya waalidiinta/wakiilada/masuuliyiinta ardayda ku dhex nool bulshooyinka xaqa u leh ayaa codsan kara dugsiga.

Leh dad loo qoondeeyey oo leh Isku baan-dhaynta Magaalada oo dhan ah: Ka dib marka ardayda ku nool dugsiga aagga meelaynta caadiga ah la meeleeeyo, wixii boosas ah ee weli jira waxaa lagu buuxiyaa habka bakhtiyaa-nasiibka. Waalidiinta/wakiilada/masuuliyiinta ardayda ka soo jeeda mid ka mid ah lixda bulsho ee degmada ayaa codsan kara dugsiga.

Leh dad loo qoondeeyey oo leh Isku baan-dhaynta Goboleed: Ka dib marka ardayda ku nool dugsiga aagga meelaynta caadiga ah la meeleeeyo, wixii boosas ah ee weli jira waxaa lagu buuxiyaa habka bakhtiyaa-nasiibka. Kaliya waalidiinta/wakiilada/masuuliyiinta ardayda ku nool bulshooyinka xaqa u leh ayaa codsan kara dugsiga.

Sideen ku go'aamin karaa "bulshadayda xaqa u leh" markaan codsanayo dugsi hoose oo ah bedel kale oo gobol ah?

Liistada hoose, ka hel dugsiaga lagugu qoray ee ciwaanka ka dibna go'aami bulshadaada (Waqooyi-galbeed, Waqooyi-bari, Bari, Koonfur, Galbeed ama Bartamaha Magaalada).

<u>Northwest</u> <u>Waqooyi-galbeed</u>	<u>Northeast</u> <u>Waqooyi-bari</u>	<u>East</u> <u>Bari</u>	<u>South</u> <u>Koonfur</u>	<u>West</u> <u>Galbeed</u>	<u>Center City</u> <u>Bartamaha</u> <u>Magaalada</u>
Clinton Colerain Como Cranbrook Gables Hubbard Mastery Indian Springs Salem Weinland Park Winterset	Alpine Avalon Cassady Devonshire East Linden E. Columbus Forest Park Hamilton STEM Huy Innis Linden STEM Maize North Linden Northtowne Parkmoor S Mifflin STEM Valley Forge Windsor STEM	Berwick Broadleigh Easthaven Fairmoor Leawood Liberty Oakmont Olde Orchard Scottwood Shady Lane Woodcrest*	Cedarwood Lincoln Park Moler Parsons Southwood Watkins	Avondale Binns Burroughs Eakin Georgian Hts Highland Lindbergh Starling Sullivant Valleyview West Broad West Mound Westgate	Eastgate Fairwood Livingston Ohio Siebert Stewart Trevitt

Markaad go'aamiso bulshadaada, fadlan tixraac shaxda hoose si aad u go'aamiso dugsiyada kale ee gobolka oo aad xaqa u leedahay inaad codsato.

Waxa kale oo aad codsan kartaa mid ka mid ah Beddelka kale ee Magaalada oo dhan: Duxberry Park; Hubbard Mastery, Indianola K-8, Ode Orchard, Africentric, Columbus Spanish immersion (CSIA), Ecole Kenwood. Codsadayaasha fasalka labaad ama ka sareeya ee CSIA (Isbaanish) (Spanish) ama Ecole Kenwood (Faransiis)(French) waa inay ahaadaan kuwo aad u yaqaan luuqadda waana inay ku gudbaan/ku baasaan waraysiga dugsiaga si loogu oggolaado meelaynta bakhtiyaa-nasiibka.

Northwest (1) Waqooyi-galbeed (1)	Northeast (2) Waqooyi-bari (2)	East (3) Bari (3)	South (4) Koonfur (4)	West (5) Galbeed (5)	Center City (6) Bartamaha Magaalada (6)
--------------------------------------	-----------------------------------	----------------------	--------------------------	-------------------------	---

Hamilton Devonshire Oakland Park Windsor	Cassady Olde Orchard Devonshire Oakland Park Windsor	Fairwood Berwick Olde Orchard Cedarwood Stewart Windsor	Fairwood Berwick Cedarwood Stewart Westgate	Fairwood Georgian Heights Cedarwood Stewart Westgate	Fairwood Hamilton Devonshire Stewart Windsor Westgate
---	--	--	---	---	--

Sideen ku ogaan karaa dugsiga u fiican/u roon ilmahaaga?

Qiimee kartida ilmahaaga, awoodihiisa/awoodaheeda, iyo waxa uu xiiseeyo. Tusaale ahaan, ilmahaagu ma u eg yahay inuu wax badan baranayo marka uu isagu is-hagayo ama marka la siiyo tilmaamo faahfaahsan? Ilmahaagu ma leeyahay karti gaar ah ama xiise ma uleeyahay akhriska iyo qoraalka, fanka, afafka ama dhaqamada qalaad? Ka fikir waxyaabo kale oo muhiim u ah ilmahaaga. Inkasta oo dhammaan dugsiyadeenu ay kobcin doonaan waxbarashada ilmo kasta, dugsi kastaa maaha mid ku habboon ilmo kasta.

Go'aanso waxyaabaha kale ee muhiimka kuu ah. Gaadiidka basku ma muhiim buu kuu yahay mise ma waxaad qorshaynaysay inaad ku qaado/bixiso gaadiidkaaga? Ilmahaagu ma u baahan yahay adeegyada waxbarashada gaarka ah? Ma u baahan tahay barnaamijka Latchkey ka hor-dugsiga ama ka dib-dugsiga? Ma u baahan tahay dugsi kuu dhow daryeel bixiyahaaga (daycare provide)? Heerarka dugsiga dhexe iyo sare, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad raadsato dugsiyo ama barnaamijyo ku habboon hamiga ilmahaaga ee xulashada kulliyadda ama yoolalka xirfadeed/shaqo.

Ka fiirso bandhigyada fiidyowga dugsiga ee degelka/shabakada oo ka soo qayb-gal Bandhigga/carwada Xulashada/doorashada Dugisga ee Intrenet-ka (Virtual-ka) si aad ula kulanto maamulka dugsiga. Weydii su'aalo ku saabsan dano gaar ah oo aad yeelan karto una isticmaal si aad u qiimeyso fursadahaaga/suurtagalnimadaada.

Sideen ku heli karaa macluumaadka ku saabsan/ku aadan dugsiyada kala duwan?

Booqo mareegaha dugsiyada kuwaas oo laga yaabo inaad xiisaynayso. Mid kasta oo ka mid ah dugsiyadeena wuxuu soo ban-dhigay/dhejiyay muuqaal ka bixinaya macluumaad qiimo leh oo ku saabsan dhismahooda. Dugsiyada Magaalada Columbus waxa ay martigelin doonaan Ban-dhigga Xulashada/Doorashada Dugisga Khamiista, 13-ka Janaayo laga bilaabo 1:00 p.m, galabnimo-ila 2:15 p.m., ee galabnimo. Dugsiyada Sarena laga bilaabo 6:00 p.m. - ilaa 7:30 p.m., ee galabnimo. Dugsiyada Dhexe iyo Sare. Bandhiga/carwada Doorashada/Xulashada Dugsiyada Hoose waxa la qaban doonaa Khamiista, 3-da Febraayo laga bilaabo 6:00 p.m., galabnimo ilaa- 7:30 p.m., ee galabnimo. Tani waa hab fiican oo aad kula kulmi karto maamulaha oo aad waydiiso su'aalo dheeraad ah oo aad u baahan tahay si aad u qiimeyso fursadahaaga/shaqo. Fadlan booqo bogga CCS si aad u heshid xiriirinta bandhigyada/carwooyinka doorashada/Xulashada dugsiyada ee Internet-ka (Virtual-ka). Waxa kale oo jira buug mid kasta oo ka mid ah maktabadaha laanta Columbus cinwaankiisu yahay, Xaqiiqooyinka deg-degga ah ee ku saabsan Dugsiyada Columbus, kaas oo ay ku jiraan bogg ama labo bogg oo ku saabsan mid kasta oo ka mid ah dugsiyada.

Kaliya ma imaan karaa dugsiga si aan u soo indho-indheeyo?

Wac dugsiga aad rabto. Lambarada teleefoonka ee dugsi kasta waxaa laga heli karaa faylasha (profiles-ka) dugsiga. Dugsiyada badankoodu waxay bixiyaan booqashooyin taariikho iyo wakhtiyo gaar ah, sidaa awgeed waxa fiican inaad wacdo xafiiska dugsiga gaarka ah si aad u diyaarsato wakhti ka hor. Inta badan dugsiyadu ma qaban doonaan booqashooyin/indho-indhayn bisha Febraayo ama Maarso sababtoo ah waxay isku dayayaan inay si buuxda diiradda u saaraan u diyaargarowga imtixaanka gu'ga, markaa la xiriiir dugsiga sida ugu dhaqsaha badan. Dugsiyo dhowr ah ayaa bixiya kormeerid/indho-indhayn u furan macluumaadka waalidiinta daneynaya.

Goorma ayay dDacayaan/La qabanayaa Bandhigyada Xulashada/Doorashada Dugsiga ama shirarka kale ee xog-warran?

Sannadkan, Bandhigga/carwada Dugsiga Sare iyo Dugsiga Dhexe waxa la qaban doonaa sida dhab ah Khamiista, 13-ka Janaayo laga bilaabo 1:00p.m., duhurnimo. -ilaa 2:15 p.m., duhurnimo ee Dugsiyada Sare, iyo 6:00 p.m., galabnimo -ilaa 7:30 p.m., galabnimo ee Dugsiyada Dhexe iyo Sare. Bandhigga/carwada Doorashada/Xulashada Dugsiyada Hoose waxa la qaban doonaa Khamiista, 3-da Febraayo laga bilaabo 6:00 p.m., galabnimo. ilaa 7:30 p.m., ee galabnimo. Isku xirka rugta casriga ah ee dugsi kasta ayaa lagu dhejin/soo bandhigi doonaa mareegaha/websaydyada CCS kahor taariikhda Bandhigga Doorashada/Xulashada Dugsiga. Dhammaan maamulayaasha ayaa ka soo qayb-gali doona bandhigooda si ay uga jawaabaan su'aalaha ku saabsan dugsigooda.

Koorsooyinka xarunta xirfadaha/shaqada ee dugsiga sare waxaa laga helaa lataliyyaal hagitaan iyo isku-duwayaasha waqtiyada taba-barkala (internship) ee dhammaan dugsiyada sare. Macluumaadka xarumaha xirfadaha/shaqada iyo tababarada shaqo ee ka qalin-jabinta dugsiga sare ka dib ayaa laga heli karaa bandhigga dugsiga sare ama lataliye kasta oo dugsiga sare ah.

Waxaan rajaynaynaa in aad nagu soo biirto maalmahan.

Waa maxay habka/nidaamka meelaynta suurtagalka ah iyada oo loo marayo bakhtiyaa-nasiibka?

Isku shaan-dhaynta/Isku aadka danabaysa/elektarooniga ah ayaa loo dhamayn doonaa dugsi kasta iyo fasal kasta ka dib wakhtiga kama dambaysta ah ee codsiyada wakhtiga ku habboon.

Waalidiinta/Wakiilada/Masuuliyiinta ayaa heli doona wicitaan toos ah iyo iimayl marka natiijooyinka bakhtiyaa-nasiibka la heli karo si loo eego Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal). Waalidiinta/Wakiilada/Mas'uuliyiinta waxay awoodi doonaan inay fiiriyaan haddii wax la soo bandhigay iyo/ama lambarka liiska sugitaanka mid kasta oo ka mid ah dugsiyadii ay codsadeen.

Shaqaalaha Xulashada/Doorashada Dugsiga waxay la shaqeeyaan dhammaan Dugsiyada Magaalada Columbus si ay u go'aamiyaan tirada codsiyada ee ay tahay in la ogolaado si loo buuxiyo boosaska ka bannaan dugsi kasta. Ogeysiisyada xiga ee soo jeedinta ayaa lagu soo diri/samayn doonaa lambarka taleefonka iyo iimaylka lagu soo muujiyay/bandhigay Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal). Waalidiintu waxay haystaan laba maalmood oo ay ku ogolaadaan/ku aqbalaan wax soo jeedinta/deeqda, sidaas darteed waa muhiim in iimaylka iyo lambarada teleefoonada la ilaaliyo oo marar badan la hubiyo/la fiiriyo. Soo jeedinta/deeqda aan la ogolaanin/la aqbalin wakhtiga kama dambaysta ah waa la diidi doonaa waxaana la siin doonaa ardayga ku xiga ee liiska sugitaanka meelaynta.

Maxaa dhacaya haddii ardaygayga lagu sii hayo/uu sii joogo ka dib marka la ogolaado/la aqbaloo soo jeedinta bakhtiyaa-nasiibka?

Bakhtiyaa-nasiibka CCS waa mid leh heerar/darajooyin gaar ah. Haddii ardayga lagu sii hayo/uu sii joogo, bakhtiyaa-nasiibka la ogolaaday/la aqbalay waa laga noqon doonaa, ardaygana dib ayaa loogu diiwaan gelin doonaa dugsigii hore ee uu dhigan jiray. Haddii ardaydu doortaan inay is-diiwaan-geliyaan, waxay heli doonaan fursad ay ku dhammeeyaan dugsiga jiilaalka/kulaylaha. Marka la dhammeeyo dugsiga jiilaalka/kulaylaha, haddii ardayga loo dalacsiyo/loo gudbiyo heerka fasalka ee lagu soo gudbiyay arjiga bakhtiyaa-nasiibka, meelaynta bakhtiyaa-nasiibka ee la ogolaaday/la aqbalay ayaa dib loo soo celin doonaa/laga noqon doonaa.

Mudnaanta Walaalaha - Walaalaha waxaa lagu qeexaa inay yihiin arday ku nool hal guri oo waalid wadaag ah.

Haddii ay soo baxdo meel bannaan natiijada bakhtiyaa-nasiibka bilowga ah ka dib, ardayda ku jirta liiska sugitaanka waa in loo soo bandhigaa habka soo socda:

1. Dhammaan Dugsiyada Hoose iyo Dugsiyada Dhexe iyo Dugsiyada Sare ee Caadiga ah: Marka jawaabaha bakhtiyaa-nasiibka asalka ah la habaysan /la sameeyo, kuraas kasta oo aan la ogolaanin la/aqbalin waxaa la siin doonaa walaalaha ku jira liiska sugitaanka iyada oo loo eegayo siday u kala horreeyaan walaalaha loo soo saaray bakhtiyaa-nasiibka. Marka ay dhammaan walaalaha ku jira liiska sugitaanka la meeleeeyo, liiska sugitaanka ee aan walaalaha ahayn ayaa dib u bilaaban doona.
2. Isu geynta Dugsiyada Dhexe iyo Dugsiyad Sare ee Beddelka kale ah: Marka jawaabaha bakhtiyaa-nasiibka asalka ah la habeeyo/la sansameeyo, kuraas kasta oo aan la ogolaanin/la aqbalin waxaa la siin doonaa walaalaha ku jira liiska sugitaanka iyada oo la raacayo liiska sugitaanka ee aan walaalaha ahayn sida ay u kala horreeyaan ee loo shaan-dheeyay bakhtiyaa-nasiibka. Ma jiri doonto mudnaan walaalnimo oo loogu talagalay ardayda lagu meeleeeyo habka gelitaanka xulashada.

Immisa dugsi ayaan codsan karaa?

Codsi kasta, waxaad codsan kartaa ilaa 3 dugsi doorasho oo kala duwan oo isugu jira dugsiyada caadiga ah iyo kuwa kale. Dugsiga waxa la dooran karaa hal mar oo kaliya. Hubi inaad codsaty fasalka saxda ah ee sanad-dugsiyeedka 2022-2023. Codsashada heerka fasalka khaldan waxay meesha ka saaraysaa wax kasta oo la soo bandhigay.

Intee in le'eg ayay tahay in aan ogolaado/aqbaloo ama aan diidaa soo jeedinta/deeqdada?

Jawaabaha soo jeedinta/soo bandhigidda waa in lagu soo gudbiyaa/lagaga soo jawaabaa laba maalmood gudahooda laga bilaabo bixinta/soo jeedinta. Waalidiinta/wakiilada/mas'uuliyiinta waxaa laga yaabaa in aysan haysan karin wax soo jeedin/dalab ah. Waa inay go'aan ka gaaraan dhammaan soo jeedinta loo sameeyay/loo soo bandhigay. Haddii soo jeedinta la aqbaloo/la ogolaado, dhammaan codsiyada firfircoon ee haray ee ardayga waa la diidi doonaa. Haddii jawaabta soo jeedinta la heli waayo/laga soo jawaabi waayo wakhtiga kama dambaysta ah ee la sheegay, soo jeedinta waa la diidi

doonaa waxaana deeqda la siin doonaa ardayga ku xiga ee liiska sugitaanka. Haddii soo jeedinta/dalabka la diido, ilmahaagu waxa uu ku jirayaa liiska sugitaanka ee dugsiyada kale ee aad ka codsatay.

Haddii aanan ku jiro liiska sugitaanka ee dhammaan xulashooyinka/doorashooyinka dugsigeyga, sidee la ii ogeysiin karaa haddii wax la ii soo bandhigo/la ii soo jeedinayo?

Waalidiinta/Wakiilka/Masuulka ayaa heli doona wicitaan taleefoon oo toos ah iyo iimayl marka la bixiyo bakhtiyaa-nasiibka, waase haddii iimaylka saxda ah iyo lambarka taleefoonku ay ku jiraan koontada Xiriirka Waalidka (Parent Portal account).

Ma jiraan wax aan samayn karo si aan u hubiyo/u-goodo in nidaamku uu si habsami leh ugu socdo codsiga ilmahaaga?

Hubi in Xariirkaaga Xarunta Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal) uu ka tarjumayo iimaylka saxda ah iyo lambarada taleefoonka. Haddii ay jiraan sixid loo baahan yahay, fadlan xogtaada ku cusboonaysii adiga oo u soo marinaya isticmaalaya furaha (tab-ka) xogta tirakoobka dadka ee Xiriirka Waalidka (Parent Portal). Haddii ciwaanka ama xubnaha qoysku aanay sax ahayn, fadlan ku soo gudbi Cusbooneysiinta Sannadlaha ah iyada oo loo sii marayo Xiriirka Waalidka ee (Parent Portal).

Waa maxay sababta aan go'aan uga gaaro dugsiyada la soo jeediyo/la soo bandhigo/la bixiyo 2-ba maalmood gudahood? Maxaan u sugi la'ahay dhowr toddobaad si aan u eego bal in la ii soo bandhigo/la ii soo jeediyo dugsi kale?

Haddii soo jeedinta la ogolaado/la aqbaloo, waxay yaraynaysaa tirada kuraasta hartay/hadhay ee la heli karo si ay u siiso codsade kale. Marka dalabka la diido, waxa ay noo ogolanaysaa in aan siino kursiga codsadaha soo socda/ku xiga ee ku jira liiska sugitaanka. Haddii qofna/cidi ka jawaabi waydo, ma jiri doonto qof isaga sii jiri doona liiska sugitaanka weligiis oo aan kor uqaadi doono si aan u siino cunugga/ilmaha soo socda ee xiga kursi. Habka meelaynta ayaa joogsan doonta.

Xasuusnoow, haddii aad wali ku jirto liiska sugitaanka, waxaad rajaynaysaa in kuwa kale ay diidi doonaan soo jeedinada/siinta/dalabaadka dugsiyada aad rabto si aad codsigaaga ugu sii gudbisoo meel sare oo liiska sugitaanka ah. Fadlan fahan/garo in kuwa kale ay ku jiraan xaalado isu egg.

Maxaa dhacaya haddii aan ogolaado/aqbaloo soo jeedinta iyada oo loo marayo bakhtiyaa-nasiibka?

Haddii soo jeedin la sameeyo oo la ogolaado/la aqbaloo ka hor maalinta koowaad ee dugsiyada, ardayga waxaa loo qorsheeyay/jadwalayey inuu bilaabo dugsiyada ogolaanshaha/aqbalaadda maalinta ugu horreysa ee sannad-dugsiyeedka 2022-2023. Marka ogolaanshaha la sameeyo, ardaygu waxa ka go'an/qasab ku ah dugsiyada. Dhammaan codsiyada kale ee bakhtiyaa-nasiibka ah waa la tirtiray/laga noqday la joojiyey oo kursigiisii / kursigeedii dugsigii hore ama dugsiyada xaafadda (guriga) waxaa la siinayaa ardayda kale. Haddii waalidka/wakiilka/masuulka ay beddelaan maskaxdooda ka dib marka la aqbaloo, codsiga bakhtiyaa-nasiibka cusub waa in loo gudbiyaa dugsi kale, xitaa haddii uu yahay

dugsigoodii asalka ahaa cinwaan ahaan. Ardayga wali waxaa lagu meelayn doonaa dugsigii ugu horeyay ee laga ogolaaday/la aqbalay ilaa inta laga helayo bakhtiyaa-nasiib kale.

Haddi is-diiwaan-galinta lagu dhamaystiro Isku dhafka (BlendED), ardaygu waxa uu ka tanaasulayaa kursigiisii la ogolaaday/la aqbalay ee bakhtiyaa-nasiibka oo waxa lagu qori doonaa dugsiga ciwaanka.

Haddii dugsiga ciwaanka uu yahay mid buuxa, ardaydu waxa lagu meelayn doonaadugsiga ugu dhow oo la heli karo.

Haddii bakhtiyaa-nasiibka la aqballo maalinta koowaad ee dugsiga ka dib, ardaygu waa la diwaan-gelinayaa si uu u bilaabo maalinta xigta ee ogolaanshaha/aqbalka (waalidku wuxuu u baahan doonaa inuu ardayga geeyo dugsiga maalinta ugu horeysa si loo helo gaadiidka la codsado - haddii ay khuseyso). Haddii ardaygu ka diiwaan-gashan yahay Isku dhafKA (BlendED) oo uu ogolaado/aqbalo soo jeedinta bakhtiyaa-nasiibka ka dib bilawga sanad-dugsiyeedka, waa laga saari doonaa Isku dhafKA (BlendED) oo waxaa la qori doonaa si ay u bilaabaan maalinta xigta dugsiga ogolaanshaha/aqbalaadda. Ardaydu uma qalmi doonaan inay dib iskugu qoraan Isku dhafKA (BlendEd) sannad-dugsiyeedka hadda ah ka dib marka la aqballo bakhtiyaa-nasiibka.

Laga bilaabo JXagaaga/Qaboobaha 2023, codsiyada bakhtiyaa-nasiibka waa la aqbali doonaa sannad-dugsiyeedka 2023-2024. Waalidiinta/Waakiilada/Masuuliyiinta ayaa laga yaabaa inay buuxiyaan Codsiga Ku-noqoshada Arjiga Dugsiga-xaafadda (Guriga), si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaysan mar walba suurtoagal ahayn in la bixiyo meelayn. Waalidiinta/wakiilada/mas'uuliyiinta waxay sidoo kale codsan karaan dugsiga kale iyada oo loo marayo bakhtiyaa-nasiibka haddii dugsigii ay markii hore doorteen uusan si buuxda u buuxin baahidooda. Taariikhaha soo gudbinta arjiga bakhtiyaa-nasiibka waxaa lagu dhejin doonaa mareegahadegelada/websaydyada CCS.

Waa muhiim in waalidiinta/wakiilada/masuuliyiinta iyo ardaygu ay hubiyaan inay rabaan in dugsiga loo ogolaaday/la siiyey ka hor intaysan aqbalin meelaynta bakhtiyaa-nasiibka. Kadib marka la aqballo soo jeedinta, wac dugsiga si aad u ogaato waxa ku saabsan hanuuninta/xog siinta ama habeenada macluumaadka.

Ka dib marka uu hal sano dhameeyo dugsiga loo doortay ee bakhtiyaa-nasiibka, ilmahaygu ma ku noqon/laaban karaa dugsigiisa/geeda "guriga" ciwaan ahaan?

Maya si toos ah. Horraanta Janaayo ee sannad kasta, Foomka Codsiga Ku-noqoshada Guriga ayaa laga heli karaa intarneedka iyo dhismo dugsiga kasta/walba. Waalidiintu waxay buuxin karaan foomka oo ay u gudbin karaan Qaybta Xulashada/Doorashada Dugsiga. Tani ma dammaanad qaadayso soo laabashada/soo noqoshada, laakiin haddii boos bannaan yahay ardayga waxaa lagu soo celinayaa dugsiga ciwaanka ka hor inta aan meelaynta bakhtiyaa-nasiib ah la samaynin. Haddii ardayga lagu soo celin waayo dugsiga cinwaanka, waalidka waa lala xiriiri doonaa.

Su'aalo dhowr ah oo ay tahay in lagu tixgeliyo habka go'aan qaadashada/gaarista waa: Haddii aad horay usii ogayd inaad ku laaban karin dugsigii hore, wax isbeddel ah ma ku samaynaysaa go'aankaaga? Haddii ilmahaagu si fiican u shaqeeyo, faraxsan yahay, oo aad ku faraxsan tahay dugsiga uu hadda ilmuhu dhigto, caqli miyey tahay inaad ogolaato/aqbasho codsi/dalab dugsiga kale ah?

Kahor Fasalka barbaarinta ee (Pre-K) - Dhammaadka sannad-dugsiyeedka, Waxbarashada Guud Ardayda Kahor Fasalka barbaarinta ee (Pre-K) waxaa lagu qori doonaa ciwaanka dugsigooda ee barbaarinta (kindergarten-ka). Qoysaska doonaya inay ku sii nagaadaan isla dugsigu, haddii aanay ahayn dugsigu cinwaanka, ee sannadka soo socda, waxay u baahan doonaan inay codsadaan iyaga oo usoo maraya bakhtiyaa-nasiibka si ay u helaan fursad ay ku sii joogaan.

Haddii aan helo dugsi iyada oo loo marayo bakhtiyaa/nasiib, ma inaan sannad walba codsadaa si aan u joogo dugsigu?

Marka lagu aqbalu/lagu ogolaado bakhtiyaa-nasiibka, waxaa lagugu meelayn doonaa dugsigu ilaa sanadka u dambeeya ee lagu bixiyo dhismahaas ilaa aad codsato oo aad aqbasho/ogolaato dugsi kale, ama aad u guurto ciwaan cusub oo ku dhex jira/ku dhex yaala CCS oo aad doorato inaad si degdegg ah ugu beddelato dugsiguaga cusub cinwaan ahaan. Haddii aad u guurto ciwaan ka baxsan xuddudaha CCS, waxaad u baahan doontaa inaad codsato inaad joogto. Bal eeg/fiiri mar dambe FAQs-yada khuseeya ee Diiwaangelinta Furan ee Degmooyinka dhexdooda (IOE).

Waa kuwee dugsiyada hoose ee CCS oo bixiya maalinta buuxda iyo kuwa ka soo hor jeeda ee bixiya fasalka xanaanada kindergarten-ka ee ah maalin-barkeed/badhkeed?

Ardayda Fasalka barbaarinta (Kindergarten-ka) ee dhammaan dugsiyada hoose ee CCS waxay dhigtaan barbaarinta (Kindergarten-ka) maalinta oo buuxda.

Wali ma codsan/dalban karaa bakhtiyaa-nasiibka haddi ilmahaygu aanu gaarin/gaadhin 5- jir 30-ka Sebtembar, 2022?

Codsiyada carruurta aan gaari/gaadhi doonin 5 sano ilaa 30-ka Sebteember ka dib lama ogolaan/aqbali doono ilaa ilmuhu ubadku uu ku gudbo/ku baaso Imtixaanka Gelitaanka Hore (EET), kaas oo ay dhamaystirto bisha Juun Waaxda Hibada iyo Kartida. Codsiyada bakhtiyaa-nasiibka dambe ee carruurta buuxisa shuruudaha waxa la ogolaan/aqbali doonaa bisha Juun haddii codsiga uu la socdo nuqul ka mid ah warqadda oggolaanshaha ee EET.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu leeyahay baahiyo gaar ah sida Waxbarashada Gaarka ah ama Ingiriisiga sida Luuqadda Labaad (ESL), ama aan rabo inaan codsado Akadeemiyadda Hibada?

Waaxda Waxbarashada Gaarka ah ee Degmada, Waaxda Ingiriisida sida Luuqadda Labaad ahaan, ama Xafiiska Hibada iyo Kartida ayaa laga yaabaa inay ku siiyaan macluumaadka doorashooyinka/ikhtiyaariga barnaamijka. Waalidiinta/wakiilada/masuuliyiinta waxay kala xiriiri karaan shaqaalaha lambarada soo socda:

Hibada iyo Kartida = 614-365-6626

ESL-KA = 614-365-8802

Waxbarashada gaarka ah = 614-365-5206

Waa maxay ESL-KA sideense ku helaa barnaamijka?

ESL waxay u taagan tahay Ingiriisi sidii Luuqad Labaad. Carruurta ku dhalatay ama ku noolayd waddan aan Maraykanka ahayn, ama afkooda hooyo ee guriga looga hadlo aanu ahayn Ingiriisi, ama leh/haysta mid ama labada waalidba oo ku dhashay meel ka baxsan Maraykanka, waxaa lagu qiimayn doonaa in ay Ingiriisi helaan wakhtiga isdiiwaangalinta/isqorista ee (fasalada K-ilaa-12-aad).

Maxaan u baahanahay inaan keeno si aan ilmahayga uga diiwaan-geliyo/ugu qoro dugsiga?

Fadlan booqo mereegta/bogga Diiwaa-ngelinta ee bogga Dugsiga Magaalada Columbus (<http://www.ccssoh.us/Enrollment.aspx> (<http://www.ccssoh.us/Enrollment.aspx>)) si aad u hesho liiska dukumiintiyada/waraaqaha looga baahan yahay diiwaangelinta.

Meelaynta xanaanada carruurta suurtagal ma tahay iyada oo loo marayo Qaybta Xulashada/Doorashada Dugsiga?

Maya. Meelaynta xanaanada carruurta ee ku salaysan baahida waalidnimo ee la soo bandhigay waxaa kaliya oo laga heli karaa Qaybta Diiwaan-gelinta inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka ka dib marka nidaamka bakhtiyaa-nasiibka ee sanadka la dhammeeyo. Kahor bilowga dugsiga, waalidiintu waa inay codsadaan meelaynta nidaamka doorashada dugsiga bakhtiyaa nasiibka. Kadib markuu sanad-dugsiyeedku bilaabmo, waalidiintu waxay codsan karaan beddelka xanaanada daryeelka ilmaha. Kaliya haddii liiska sugitaanka bakhtiyaa-nasiibka loo fasaxay fasalka oo dugsiga la codsado ayaa la oggolaan karaa beddelka xanaanada cunugga/ilmaha.

Waalidiintu waa inay kala xiriiraan/xidhiidhaan Qaybta Diiwaan-gelinta ee ah 1-380-997-7683.

Ka waran haddii ilmahayga laga saaray/laga soo eryey dugsiga, ma u banaan yihiin/miyey u-qalmaan inay dugsi codsadaan bakhtiyaa-nasiibka ah?

Ardayda laga eryay beddelka/wareejin, maya/ma codsan karaan inay ku noqdaan dugsigii laga eryay. Ardayda la eryay 10 maalmood ama ka badan inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka hadda, waxay codsan karaan bakhtiyaa-nasiibka 100% dugsiyada bakhtiyaa-nasiibka kaliya ee sannad-dugsiyeedka soo socda.

Waxaan u guurayaa ciwaan cusub oo ku yaala Degmado-Dugsiyeedka Magaalada Columbus. Maxay tahay waxa aan u-baahanahay inaan ogaado?

Go'aanka ku saabsan diiwaan-gelinta waa in la sameeyaa wakhtiga guuritaanka. Waxaad haysataa laba ikhtiyaar/fursadood:

Waxa laga yaabaa inaad ilmaha ku hayso dugsiga hadda. Si kastaba ha ahaatee, waxay ku xiran/xidhan tahay meesha uu ku yaal degaanka cusub, waxa laga yaabaa inaad masuul ka tahay gaadiidka. Fiiro gaar ah: Haddii aad doorato inaad ku sii jirto dugsigaaga hadda inta ka hadhay sanad dugsiyeedka, waxaad u baahan doontaa inaad ku codsato bakhtiyaanasiibka si aad u dhigto "dugsiga cusub cinwaanka" sanadka soo socda. Ha u qaadan in si toos ah sannad dugsiyeedka xiga loogu diiwaan gelinayo cinwaankaaga cusub. Fadlan la xidhiidh Qaybta Doorashada Dugsiga wixii talo ah haddii aad aaminsan tahay inaad xaaladdan ku jiri doonto. Waxaan ku siin karnaa qiyaasta fursadahaaga guusha ee wareejinta sanadka soo socda. Haddii uu aad u daahay sannad-dugsiyeedka, doorashooyin kale ayaa suurtagal noqon kara. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, ka wac Doorashada Dugsiga 614-365-7459.

Fursada/Doorashada/Xulashada kale ayaa ah inaad isla markaaba ilmaha ka diwaan-geliso dugsiga cusub ee ciwaanka Xarunta Diiwaan-gelinta Dhexe, oo ku taal 430 Cleveland Avenue.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, ka wac Doorashada/Xulashada Dugsiga ee 614-365-7459 ama iimayl u dir schoolchoice@columbus.k12.oh.us.

Waxaan u baahanahay inaan ka codsado Diiwaan-gelinta Furan ee Degmooyinka dhexdooda (IOE); ma jiraan xog gaar ah/macluumaad gaar ah oo aan u baahanahay inaan ogaado?

U-qalmiitaanka/Xaq u yeelashada Guud ee Codsiga

- Kaliya ardayda raba/doorashada in si waqti-buuxda loogu diiwaan-geliyo fasalada K-12-aad ee Dugsiga Magaalada Columbus (CCS) ayaa u qalma inay codsadaan IOE. Ardayda waqtiga-dhiman xaq uma laha meelaynta IOE.
- Ardaydu waa inay ahaadaan da'da 5 sano jir 30-ka Sebteembar si ay u codsadaan fasalka xanaanada ee kindergarten-ka ee IOE.
- Hoyga waalidka/wakiilka/masuulka waa inuu ku yaal meel ka baxsan xuddudaha Dugsiyada Magaalada Columbus.
- Ardayda dugsiga laga cayriyey ama laga eryey 10 ama in ka badan oo xiriir ah/xidhiidh ah sannad-dugsiyeedkii hore uma qalmaan inay codsadaan gelitaanka IOE sannad-dugsiyeedka soo socda.

Siday u kala horreeyaan in meelayntu u dhacdo:

1. Ardayda CCS ee ku jira liiska diiwaan-gelinta Furan ee Degmada Gudaha ah (sidoo kale loo yaqaan "Bakhtiyaa-nasiibka") oo soo dhigay arjiga wakhtiga saxda ah ee ku habboon.
2. Ku soo celinta ardayda ee Diiwaangelinta furan ee Degmooyinka Dhexdooda oo ah carruurta ay dhaleen shaqaalaha, soo gudbiyay waqti ku haboon codsi ku saabsan ku soo celinta sanadka soo socda.
3. Ku soo celinta ardayda Diiwaan-gelinta furan ee degmooyinka dhexdooda ah kuwaas oo soo gudbiyay waqti ku haboon codsi ku saabsan ku soo celinta sanadka soo socda.
4. Ardayda CCS ee ku jira liiska sugitaanka Diiwaan-gelinta Furan ee ah Degmada Dhexdeeda (sidoo kale loo yaqaan "Bakhtiyaa-nasiibka") oo soo gudbiyay codsi ka dib waqtiga kama dambaysta ah.
5. Ardayda cusub ee iska diwaan-gelinaya degmooyinka dhexdooda oo ah carruurta shaqaalaha degmada, kuwaas oo soo gudbiyay codsiga waqtiga ku beegan/ku haboon si ay u dhigtaan/u-xaadiraan dugsiga degmada.
6. Ardayda cusub ee Diwaan-gelinta Furan ee Degmooyinka dhexdooda oo soo gudbiyay codsiga waqtiga ku beegan/ku haboon si ay u dhigtaan/u-xaadiraan dugsiga degmada.
7. Arday kasta oo iska diwaan-gelinaya Degmooyinka dhexdooda oo soo gudbiyay codsi ka dib waqtiga kama dambaysta ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan IOE

Haddii ardaygu u-guuro meel ka baxsan Degmada CCS inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka, ciwaanka waa in la cusboonaysiiyaa iyada oo loo marayo Cusboonaysiinta Sannadlaha ah ee Xiriirka Waalidka (Parent Portal) iyo codsiga IOE waa in lagu soo gudbiyaa laba toddobaad gudahooda ka dib guuritaanka. Soo gudbinta arjiga ma dammaanad qaadayso oggolaansho.

Codsiga waa in la xareeyo sannad kasta si loogu tixgeliyo meelaynta sii socota ee IOE.

Codsiyada waxay raacaan/la socdaan waqti isku mid ah sida Diiwaan-gelinta Furan ee Degmada Gudaheeda ah (sidoo kale loo yaqaan "Lottery").

Fiiro gaar ah: Ardayda u guurtay degmo kale sannad-dugsiyeedka, oo loo oggolaaday inay dhammeeyaan sannadka waxbarashada bilaashka ah, waa inay buuxiyaan codsi cusub sanadka soo socda.

Si kastaba ha ahaatee, waxay lahaan/heli doonaan mudnaan ka sareysa codsadayasha cusub ee IOE ee aan tagin/dhigan CCS 2021-2022 ilaa inta codsiga la soo gudbinayo WAQTIGA KU HABOON. Haddii aad ka wel-wel-san tahay "fursadaha" sanadka soo socda, la xiriir Qaybta Doorashada/Xulashada Dugsiga ee (614-365-7459). Ama iimayl ahaan ugu dir schoolchoice@columbus.k12.oh.us

Gaadiidka

Gaadiidka ardada dhigata dugsi iyada oo loo marayo ilaa IOE waa masuuliyada waalidka/wakiila/masuulka. Haddii ay jirto meel ku taal dariiqa/jidka baska ee u adeegaya dugsiga la oggolaaday/la aqbalay, waxa laga yaabaa inay heli karaan gaadiidka baska ee Dugsiyada Magaalada Columbus. Haddii baska uu buuxsamo iyada oo ay sabab u tahay tirada kororka ee kor u kacaysa ee rakaabka ee ay si toos ah u qoondaysay Waaxda Gaadiidka, waalidka/wakiilka/masuulka ayaa mar kale u baahnaan doonaan inay bixiyaan gaadiidka. Dadka degan Dugsiga Degmada Columbus waxay helayaan mudnaanta koowaad ee booska bannaan ee baska CCS.

U-qalmitaanka Ciyaaraha fudud.

Waxa jira xukun ka soo baxay Ururka Ciyaaraha Fudud ee Dugsiga Sare ee Ohio (OHSAA) kaas oo saamayn kara u-qalmitaanka ciyaaraha ee meelaynta cusub ee ardayda dugsiyada sare ee degmada dhexdeeda ee galaya ka dib bilowga fasalka 9-aad. Ardaydaas waxa laga yaabaa inay u baahdaan inay ka fariistaan/fadhiistaan muddo ka hor inta aanay dib u helin u-qalmitaanka ciyaaraha fudud. Hubi inaad wax ka waydiiso xaalada ilmahaaga ka hor inta aanad oggolaanin/aqbalin dugsi cusub iyada oo loo marayo IOE. Ardayda Heerka Sare ee Dugsiga Sare (HS) IOE ee ku soo laabanaya isla CCS Dugsiga Sare (HS) waxay sii wadan doonaan xaq-u-yeelashooda maadaama aysan jirin wax nasasho ah oo lagu diiwaan -eliyey dugsigaas.

Ma si toos ah ayaa la ii oggolaanayaa haddii aan soo gudbiyo Codsiga ku noqoshada Arjiga Dugsiga?

Maya. Dugsigu waa inuu lahaadaa helitaan heerka fasalka/cutubka la codsaday. Fiiri isku xirka Xulashada/Doorashada Dugsiga ee Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal), 3 maalmood gudahooda laga bilaabo marka aad soo gudbiso heerka Codsigaaga Ku soo Laabashada Guriga.

Sideen ku heli karaa jawaabaha su'aalaha dheeraadka ah?

Haddii aad qabto wax su'aalo dheeraad ah, fadlan kala xiriir/xidhiidh Qaybta Doorashada/Xulashada adoo u sii maraya iimaylka Dugsiga ee ah schoolchoice@columbus.k12.oh.us ama ka wac 614-365-7459.

GENERAL LOTTERY SCREENSHOTS

Codsiga Xulashada/Doorashada Dugsiga - Xaqiijinta Magaca

Kani ma magacaagaa?

XXXXXXXXXXXX

Maya

Haa

Codsiga Xulashada/Doorashada Dugsiga - Xaqiijinta Macluumaadka Xiriirka

Sax ma yahay macluumaadkaagan xiriirka hoose?

Taleefoonka guriga --

Taleefoonka gacanta

limayl

Haddii iimaylkaaga iyo/ama taleefoonkaagu khalidan yahay, waxaa lama huraan ah inaad ku saxdo Xarunta Xiriirka Waalidka.

Ogeysiisyada laxiriira heerka bakhtiyaa-nasiibka ilmahaaga waxa lagu samayn doonaa iimayl iyo wicitaano toos ah oo lala xiriiro/xidhiidho macluumaadka/xogta xidhiidhka firfircoon ee ka imaanaya Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Campus Parent Portal).

Maya

Haa

Xulashada/Doorashada Dugsiga - Codsiyada Ardayga

[Sign Out](#) ↗

Qiyaasta Taariikhda Wakhtiga

Bakhtiyaa-nasiibka Diiwaangelinta Furan

Fasalada 6-aad ilaa 12-aad:

Fasalada Xanaanada K ilaa 5-aad:

Fasalka Kahor Barbaarinta Pre-K:

Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/doorashada

Fasalada 6-aad ilaa 12-aad:

Fasalada Xanaanada K ilaa 5-aad:

Fasalka Kahor Barbaarinta Pre-K:

Bakhtiyaa-nasiib kaduwan

Fasalada 6-aad ilaa 12-aad:

Fasalada Xanaanada K ilaa 5-aad:

Fasalka Kahor Barbaarinta Pre-K:

Bakhtiyaa nasiibka fasalka 9-aadee ROTC ee Ciidanka Cirka

ROTC - Fasallada 9-aad ilaa 12-aad:

*Dhammaan codsiyada aan la soo gudbin inta lagu jiro kala duwanaanta tariikhda kor ku xusan waxa loo tixgalin doonaa DAAHI-TAAN

Maalinta ugu dambaysa codsiyada waa la soo gudbin karaa:

Ardayda ka diiwaangashan CCS ee hadda jirta:

Ardeyda Dhawaan Is-diiwaangeliyey:

Cusub

Hore

abuorto ↗

Aqoonsiga ardayga:

[Redacted]

(Click to expand)

Student Applications

Codsii nooc ee ah ayaad jeclaan lahayd inaad gudbisoo? Sign Out

Faahfaahinta Nooca Codsiga

Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/Doorashada Dugsiga: Ardayda rabta inay codsadaan inay galaan dugsi aan ahayn dugsigii lagu qoray.

Boos Qabashada galitaanka: Ardayda hadda dhigata dugsi u qalma in ay boos/kursi ka sii xajistaan dugsiga xiga oo leh barnaamij isku mid ah.

Ku Soo Laabashada xaafadda Guriga: Ardayda dhigata dugsi ku yaala Dugsiyada Magaalada Columbus ee aan ahayn dugsigooda ciwaanka xaafadda.

Oggolaanshaha Xulashadagalidda: Ardayda loo aqoonsaday inay yihiin kuwa hibo leh oo buuxiya shuruudaha dheeraadka ah ee loo baahan yahay.

Diiwaangelinta Furan ee Degmooyinka Dhexdooda: Looguna talagalay ardayda ku nool meel ka baxsan xudduudaha Dugsiyada Magaalada Columbus oo raba inay dhigtaan dugsi ku yaal Degmada CCS.

Ciidanka Cirka ee JROTC: Ardayda galaya fasalada 9-aad - 12-aad kuwaas oo xiisaynaya inay ka qayb-qaataan Tababarka Sarkaalka Kaydka ee Junior Training Corps (JROTC) ee Fort Hayes.

Fadlan ogow: Codsiyada waa la heli karaa iyada oo lagu salaynayo shuruudaha u dhigma ee ay bixiso xogta ardaygu. Haddii aad u malaynaysa in doorashooyinkaga hoose ay khalidan yihiin fadlan la xiriir/xidhiidh Qaybta Xulashada/Doorashada Dugsiga.

Air Force JROTC School Choice Lottery

Codsiga Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/Doorashada Dugsiga - Xaqiijinta Ciwaanka Ardayga

Kani ma yahay ciwaanka koowaad ee qoyska/guriga

Columbus, OH 43202-3241

Dib u noqo Maya Haa

GENERAL LOTTERY SCREENSHOTS

Codsiga Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/Doorashada Dugsiga - Dooro Fasalka

Codsiga Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/Doorashada Dugsiga ee

Haddii fasalka _____ sanad-dugsiyeedka hoose aanu sax ahayn, door heerka fasalka saxda ah.

Fasalka Sannad-dugsiyeedka

Fasalka Sannad-dugsiyeedka

[Dib u noqo](#) [Xiga →](#)

Codsiga Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/Doorashada Dugsiga - Xulashada Ed Gaarka ah Iyo ESL-ka

Codsiga Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/Doorashada Dugsiga ee

Imahaagu ma u qalmaa Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah?

Imahaagu ma u qalmaa adeegyada Bar-tayaasha Ingiriisiga (EL)?

(EL Bar-tayaasha Ingiriisiga waxa horey loogu yiqiin Ingiriisi sida Luuqadda Labaad (ESL))

[Dib u noqo](#) [Xiga →](#)

GENERAL LOTTERY SCREENSHOTS

Codsiga Bakhtiyaa-nasibka Xulashada/Doorashada Dugsiga - Xulo/Dooro Dugsiyo

U xulo/U dooro dugsiyo **Theresa Williams**

Dugsiga ka qayb-galidda/dhigashada: Dominion Middle School

Dugsiga Ciwaanka: Centennial High School

Dugsiga ka qayb-galidda/dhigashada: Centennial High School

Muddada Codsiga:

Xulashada/Doorashada 1-aad, Xulashada/doorashada 2-aad iyo Xulashada/doorashada 3-aad

Xulashada/Doorashada 1-aad

Xulo/Dooro dugsi...

Xulashada/Doorashada 2-aad

Xulo/Dooro dugsi...

Xulashada/Doorashada 3-aad

Xulo/Dooro dugsi...

Dib u noqo

Xiga

Columbus City Map (Approximate Locations)



GENERAL LOTTERY SCREENSHOTS

Xulashada/Doorashada 1-aad, Xulashada/doorashada 2-aad iyo Xulashada/doorashada 3-aad waa inay kala duwanaadaan

Xulashada/Doorashada 1-aad

Columbus Alternative High School

Riix halkan si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Xulashada/Doorashada 1-aad

Dib u noqo

Xulashada/Doorashada 2-aad

Whetstone High School

Riix halkan si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Xulashada/Doorashada 2-aad

Xulashada/Doorashada 3-aad

Xiga

Columbus City Map (Approximate Locations)



Codsiga Bakhtiyaa-naslibka Xulashada/Doorashada Dugsiga - Shuruudaha Iyo Heshilka

Waxaa laga yaabaa inay jiraan duubid (duubitaanno/diiwaan(diiwaanno) tilmaamaya xiriirka/xidhiidhka

walaalaha ee dugsiga uu codsaday Haddii walaalaha la muujiyay aysan sax ahayn fadlan

guji ✘ Ka saar Ka saar si aad meesha uga saarto tixraca ardayga. Fadlan dhagsii +Ku dar Ku dar

haddii xiriirka walaalaha jira laakiin aan lagu muujin liiska dugsiyada.

Siblings

No sibling currently related.

+Ku dar

Dib u noqo

Xiga

Isla markiiba keen wax caddayn ah oo ku saabsan isbeddelka ciwaanka ee dugsiga hadda la dhigto ama ah xagga Xarunta Diiwaangelinta Dhexe. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan sida isbeddelka ciwaanka uu u saamayn karo codsigaaga bakhtiyaa-nasiibka, fadlan kala xiriir/xidhiidh Qaybta Xulashada/Doorashada Dugsiga ee ah 614-365-7459.

Waalidiinta ayaa ka wakiil/ka mas'uul ah inay ilaa-liyaan/la soc daan cinwaanka iimaylka ee hadda iyo lambarka taleefoonka ee Xarunta Xairiirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal). Soo jeedinta/deeqaha waxaa lagu diri/samayn doonaa iimaylka iyo lambarada taleefoonka ee la bixiyay.

U-qalmitaanka Gaadiidka (Dugsiga Hoose/Dhexe)

Haddii ilmahaagu ku nool yahay masafo u-jirta in ka badan laba mayl dugsiga, Dugsiyada Magaalada Columbus waxay bixin/ku siin doonaan gaadiid ah kuwan soo socda:

- dugsiga xaafadda ee ku salaysan cinwaanka guriga
- dugsi kasta oo caadi ah oo ku dhex yaal bulshadaada ama bulshada Bartamaha Magaalada
- dugsi kasta oo kale oo ilmahaagu u qalmo inuu codsado

Gaadiidka (Dugsiga Sare)

Gaadiidka waxaa la siinayaa ardayda u qalanta dugsiga sare iyada oo la raacayo tilmaamahan soo socda:

- Ardaygu waa inuu ku noolaado in ka badan qiyaastii laba mayl u jirta dugsiga laga soo bilaabo gudaha xuduudaha-degmada ee CCS.
- Boos-teejada/Joogsiga baska ee ardayda Dugsiga Sare wuxuu inta badan noqon doonaa meesha ugu dhow dugsiga CCS.

Walaalaha (Dugsiga Hoose) -Waxay Qusaysaa/khusaysaa Bakhtiyaa-nasiibka guud oo keliya

Walaalo waa carruur isku guri ku wada nool, isku ciwaan leh, oo wada-wadaaga wakiil/mas'uul sharci ah.

Kuraasta aan lagu oggolaanin/aqbalin iyada oo loo marayo codsiyada bilawga ah/deeqaha hore waxaa la siin doonaa walaalaha ku jira liiska sugitaanka iyada oo loo eegayo siday u kala horreeyaan. Ka dib marka dhammaan walaalaha la meeleeyo, ardayda aan walaalaha ahayn waxaa la siin doonaa meelayn sida ay ugu kala horreeyaan liiska sugitaanka.

Walaalaha (Dugsha Dhexe/Sare)-Waxay quseysaa/khusaysaa Bakhtiyaa-nasiibka guud oo keliya

Walaalo waa carruur isku guri/isku qoys ku wada nool, isku ciwaan leh, oo wada-wadaaga wakiil/mas'uul sharci ah.

Waxii Kuraas ah oo aan la buuxin ka dib codsiyada bilawga ah/deeqaha hore ee dugsiyada caadiga ah waxaa la siin doonaa walaalaha ku jira liiska sugitaanka iyada oo loo eegayo siday ugu kala horreeyaan. Kuraasta hartay/hadhay ka dib meelaynta walaalaha waxa la siin doonaa shakhsiyaadka/dadka ku haray/ ku hadhay liiska sugitaanka. Kuraasta ka harsan/ka hadhsan **dugsiyada kale** ka dib bakhtiyaa-nasiibka bilowga ah/deeqaha hore waxa lagu bixin doonaa hab kala duwan oo u dhexeeya liiska sugitaanka walaalaha iyo liiska sugitaanka ee aan walaalaha ahayn. Markaa, kursiga ugu horreeya ee liiska sugitaanka walaalaha ayaa la soo bandhigi doonaa, soo jeedinta xigta/soo bandhigista xigta waxaa laga samayn doonaa liiska sugitaanka ee aan walaalaha ahayn, kan saddexaad oo ka imaanaya liiska sugitaanka walaalaha, iyo wixii la mid ah sida kan afraad.

Shuruudaha Da'da Xannaanada ((Dugsiga Hoose)

Codsadayaasha xannaanada waa inay ahaadaan da'da 5-shan sano jir 30-ka Sebteembar. Kuwa aan buuxin shuruuda da'da ma codsan karaan ilaa ay kaga oggolaadaan/kaga caddeeyaan Imtixaanka Gelitaanka Hore (EET) ee ay bixiso Waaxda Adeegyada Cilmi-nafsiga ee bisha Juun. Nuqul ka mid ah warqadda oggolaanshaha ee EET waa in la keenaa marka codsiga la xareeynayo ama waxba lagama qaban karo hawl-gelinta.

Waxbarashada Gaarka ah iyo Ingiriisiga sida Luuqadda Labaad ee (ESL)

Waxaa lagu talinayaa in waalidiinta leh ardayda naafada ah iyo ardayda aqoontooda Ingiriisiga ay xaddidan tahay kuwaas oo xiisaynaya in ay soo gudbiyaan codsiga dugsiga beddelka ah ama kuwa caadiga ah oo ay marka hore soo booqdaan dugsiga. Ardayda naafada ah, iyo sidoo kale Bartayaasha Luuqadda Ingiriisiga, ayaa la siin doonaa fursad isku mid ah oo ay ku codsadaan dugsiyada ay doortaan iyaga oo adeegsanaya/isticmaalaya bakhtiyaa-nasiibka. Ardayda naafada ah, adeegyada lagu bixinayo dugsiga waxaa go'aamin doona kooxda IEP/Qorshaha Waxbarashada ee qof-ahaaneed.

Wareejinta/Bedelka Anshaxa

Ardaygii looga soo bedelo/looga soo wareejiyo sababo anshaxeed ee dugsiga kasta ma soo codsan karo dugsigaas. Ardayda laga eryay iyada oo loo maray Xafiiska Dhegeysiga muddo 10-ban maalmood ama ka badan oo isku xigta inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka hadda ma heli karaan nidaamka bakhtiyaa-nasiibka ee dugsiyada caadiga ah ee sannad-dugsiyeedka soo socda.

Diiwaangelinta Furan ee Degmooyinka dhexdooda (IOE)

Ardaydan ku nool **meel ka baxsan CCS** ee ah xudduudaha waa inay soo gudbiyaan arjiga IOE (iyada oo la marayo Xurunta Xiriirka Waalidka) iyo caddaynta hadda ah ee ciwaanka sannad KASTA. Soo gudbinta arjiga ma dammaanad qaadayso diiwaangelinta.

- Gaadiidka waa masuuliyad saaran waalidka.

Ciyaaraha fudud ee dugsiyada

• **AAD MUHIIM AH!** Ardayda ku celisa fasalka 9-aad ama galaya fasalka 10-aad, 11-aad ama 12-aad, ee bedelaya dugsiyada sare, uma qalmi doonaan inay ka qayb-qaataan ciyaaraha fudud ee dugsiyada dhexdooda

50% xilliga ciyaaraha/isboortiga ee uu ardaygu horay uga soo qayb-galay, oo ay ku jiraan ardayda iska diiwaan galinaysa CCS ee ka yimid dugsiga gaar loo leeyahay ama dugsiga bulsho. Ardayda sanadka ugu horeeya ee dugsiga sare, kuwaas oo aan samaynin u-qalmitaanka dugsiga hore, ma ay saamayso. Haddii aad su'aal qabtid, ballan u qabso la kulanka agaasimaha ciyaaraha. Agaasimaha ciyaaraha ma awoodo inuu bilaabo nidaamka si loo dhiso u-qalmitaanka ilaa ardaygu dhamaystiro nidaamka diiwaangelinta rasmiga ah ee dugsigooda sare oo uu dhab ahaantii uu ka diiwaan-gashanyahay oo uu aado dugsiga sare.

• Ardayda galaya fasalka 9-aad markii ugu horeysay waxay xaq u yeelan doonaan 4 sano dugsiga sare ee ay ku qoran yihiin oo ay dhigtaan maalinta koowaad, ama dugsiga uu dhigto ardaygu waxa uu ka qayb-qaataa xamaasad/Qallafsan ama ciyaar, ka hor bilaabashada xiisadaha, mid kasta oo dhaca marka hore.

• IOE Ardayda dhigata dugsiga sare ee CCS ee aan bixin ciyaaraha fudud ee dugsiyada dhexdooda sida Dugsiyada Sare ee (CAHS/Fort Hayes) kuma yeelan doonaan u-qalmitaanka ciyaaraha Dugsiyada Magaalada Columbus.

• Ardayda iska-diiwaangelisa oo taga goob kale sida (VCAP, DeVry ama xarun xirfadeed) waxa laga yaabaa inay ka qayb-galaan oo keliya dugsiga sare ee ay iska diwaangeliyeen.

• Fadlan ogow in Ururka Isboortiga Dugsiga Sare ee Ohio uu leeyahay xaddidaado/xannibaado ku aadan ka qayb-qaadashada simistarka iyo da'da oo saameeya u-qalmitaanka. Qabso kulan aad la yeelato agaasimaha ciyaaraha si aad uweydiiso su'aalo gaar ah. Ka eeg liiska hubinta xaq u yeelashada OHSAA ee onlaynka wixii tafaasiil gaar ah.

• Fadlan ogow: Koorsooyinka CCS-VCAP waxay ka hor imaanayhaan/khilaafayaan fursadaha u-qalmitaanka NCAA. Ardayda-ciyaaraha fudud waa in ay qorsheeyaan kulan ay la qaataan lataliyaha hagida ka hor inta aysan ka fikirin isdiwaan-galinta koorsada VCAP.

NIDAAMKA CODSIGA

Codsadayaasha codsada ka dib wakhtiga kama dambaysta ah waxaa lagu meeleeeyaa dhamaadka liiskooda sugitaanka sida ay u kala horreeyaan. **Haddii lagu siiyo meelayn**, jawaab ayaa loo baahan yahay waqtiga kama dambaysta ah ee la tilmaamay. Haddii jawaabta la waayo wakhtiga kama dambaysta ah, codsiga waa la burin doonaa oo ardayga ku xiga ee liiska sugitaanka ayaa la siin doonaa meelaynta. Guud ahaan, laba

maalmood ayaa lagu bixiyaa jawaabta soo jeedinta soo socota. **Oggolaanshaha bixinta dugsiga waxay burinaysaa dhammaan codsiyada kale.** Kursiga dugsigii hore ama guriga waxa la siinayaa arday kale. Haddii aad diido wax loo soo bandhigay oo aad ku jirto liiska sugitaanka ee xulashooyinkaaga kale, codsiyada liiska sugitaanka ayaa sii shaqaynaya. Soo jeedinta waxa la samayn doonaa ilaa toddobaadka ugu horreeya ee Sebtembar. Helitaanka kursiga dib ayaa loo eegi doonaa waxaana la samayn doonaa mar labaad usbuuca soo socda bartamihii kowaad iyo labaad, dhammaadka rubuci hore iyo toddobaadka ka horreeya fasaxa jiilaalka. **Haddii aad bedesho maskaxdaada waxa ku saabsan Oggolaanshaha,** waa inaad dib u codsataa meelayn kale, oo uu ku jiro dugsiga xafadda guriga ardayga oo cinwaan ahaan ah. Ilmahaaga waxa ka go'an dhigashada dugsigii asal ahaan laga oggolaaday ilaa meelayn cusub laga ansixinayo. **Haddii ardaygu meelayn uu waayo maalinta ugu horreysa ee dugsiga, meelaynta asalka ahi waxay ahaanaysaa ansax/jirta.**

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ka hor intaadan gudbinin fadlan dib u eeg [FAQs-yada Xulashada Dugsiga \(School Choice FAQs.\)](#)



Qiyaasta Taariikhda Wakhtiga

Bakhtiyaa-nasiibka Diiwaangelinta Furan

Fasalada 6-aad ilaa 12-aad:

Fasalada Xanaanada K ilaa 5-aad:

Fasalka Kahor Barbaarinta Pre-K:

Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada/doorashada

Fasalada 6-aad ilaa 12-aad:

Fasalada Xanaanada K ilaa 5-aad:

Fasalka Kahor Barbaarinta Pre-K:

Bakhtiyaa-nasiib kaduwan

Fasalada 6-aad ilaa 12-aad:

Fasalada Xanaanada K ilaa 5-aad:

Fasalka Kahor Barbaarinta Pre-K:

Bakhtiyaa nasiibka fasalka 9-aadee ROTC ee Ciidanka Cirka

ROTC - Fasallada 9-aad ilaa 12-aad:

*Dhammaan codsiyada aan la soo gudbin inta lagu jiro kala duwanaanta tariikhda kor ku xusan waxa loo tixgalin doonaa DAAHI-TAAN

Maalinta ugu dambeysa codsiyada waa la soo gudbin karaa:
Ardayda ka diiwaangashan CCS ee hadda jirta:

Ardeyda Dhawaan Is-diiwaangeliyey:

Cusub **Hore**

abuorto ↗

Aqoonsiga ardayga:

[Placeholder]

(Click to expand)

Ka bixista waxay xiri/xidhi doontaa daaqadan ee hawshaada. Ma
hubtaa inaad rabto inaad baxdo? ✕

Jooji

Waayahay

Sign Out ↗